Sharci-Hoosaadka Isbahaysiga Whittier
[Whittier Alliance By-Laws]
Qodobka III & V ee xubin ka ahaanshaha quseeya,
Xubin ka ahaansho Ganacsi & Hanti & Xubin ka ahaanshaha Guddi
Qoraal laga soo qaatay Sharci-Hoosaadka Whittier Alliance
10ka bisha Febraayo, 2015

QODOBKA III XUBIN KA AHAANSHO

Qaybta 1: **Xubin ka ahaansho** Xubin ka ahaanshaha shirkaddan qof kasta oo sideed iyo toban (18) sano jir ah ama ka wayn ayay u furan tahay; qofkaas waa inuu ahaadaa qof ku raacsan inuu oofiyo Qodobadda Wadashaqaynta iyo Sharci-Hoosaadka, kaasoo hoos yimaada marka aad fuliso oo aad ka soo baxdo mid ka mid ah shuruudahan soo socdo ayaad u qalmaysaa :

A. Waa in aad ahaataa qof Whittier deggan
B. Waa in aad ahaataa qof Whittier hanti ku leh
C. Waa in aad ahaataa qof Whittier ganacsi ku leh

Qaybta 2: **Samaysashada Xubin ka ahanshaha:** Mar haddii aad u qalanto oo shuruudihii aad ka soo baxo oo la go'aamiyo shuruudaha xubin ka ahaanshaha ku qoran Qodobka III Qaybta 1, iyo hanaanka kale oo ay dhidbeen Guddiga Agaasimayaasha Whittier Alliance [Whittier Alliance Board of Directors], xubin ka ahaanshaha wadashaqaynta waxaa la sameeyay:

Qayb-hoosaadka A. Deggan: Waa in aad timaado Whittier Alliance waa in aad ku qornaataa liiska boostada ee xaafadda Whittier ama aad isku qortay shirka Whittier Alliance.

Qayb-hoosaadka B. Milkiile Hanti iyo Milkiile Ganacsi: Waa in aad timaado Whittier Alliance waa in aad ku qornaataa liiska boostada ee xaafadda Whittier.

Qayb-hoosaadka C. Xubin ka noqoshada micnaheedu ma ahan in si atomaatik ah laguugu qoroyaayo liiska xubnaha leh xuquuqda coddaynta sida ku qeexan Qodobka III ee Qaybta 3.

Qaybta 3: **Xaq u yeelashada Xuquuqda Xubin Coddaynta** Dhammaan xubnaha oo dhan sida ku qeexan Qodobka III Qaybta 1, kuwa xubin ka ahaanshada samaystay loo sameeyay sida ku qeexan Qodobka III Qaybta 2, qofka doonaya inuu ka coddeeyo kulanka Whittier Alliance waa inuu la soo baxaa oo uu tusaa caddayn ah inuu yahy xubin xaq u leh inuu coddeeyo. Kiiba waxaa loo oggol yahay hal (1) jeer kaliya inuu coddeeyo. Inkastoo xubinka waxaa dhici kara in ay ka soo baxaan in ka badan hal shuruud ee xubin ka ahaanshaha ama leh in ka badan hal ganacsi ama hanti, xubinkaas hal (1) jeer kaliya ayuu coddayn karaa.

Qayb-hoosaadka A. **Deggan:** Caddaymaha xaq u yeelashada ee la oggolaado waxaa ka mid ah:

1. Shatiga baarbuurka lagu wado ee gobolka ama aqoonsiga gobolka ama dowladda ama aqoosiga ardaynimada ee ku dheggan sawirka qofka jecel inuu ka coddeeyo, cinwaanka Whittier kana inuu deggan yahay ku qoran.

2. Haddii cinwaanka aan ku qornayn kaarka aqoonisiga ee sirka ku deggan ama aysan la mid ahayn cinwaanka uu degan yahay, caddaymaha kale ee aad soo raacsiin karto waxaa ka mid ah biilka korontada, jeegga shaqada, ama warqadda bangiga soo diro ee ku qoran magaca iyo cinwaanka Whittier iyo aqoonsi sawir ku dheggan.

Qayb-hoosaadka B. Hanti: Milkiile kasta oo Whittier hanti u leh hal (1) cod kaliya ayuu leeyahay iyadoon loo eegayn inta hanti, ganacsi ama shirkaddo uu Whittier ku leeyahay. Tallaabooyinka la qaado samaysashada xaq u yeelasho coddayn iyo caddaymaha xaq u yeelashada waxaa ka mid ah:

1. Milkiilaha hantida ku leh waa inuu horey is-diiwaangeliyaa oo uuna xaq u yeeshaa isaga oo hor yimaada Whittier Alliance, lana yimaado oo tusiyo aqoonsi sawir ku dhegan iyo biilka korontada, ama warqadda bangiga soo diro, ama warqadda bixinta daynta guriga ama warqadda canshuurta hantida, tii kastaba waa in ay ku qornaataa magaca milkiilaha iyo cinwaanka

whittier. Haddii magaca milkiilaha hantida aanan ku qornayn dukumentiyadan, markaa waxaa loo baahnaan doonaa nuqdi ka mid ah qodobadda wadashaqaynta ee wax kale oo caddaynaya la'haanshaha hantida oo waa in lala yimaadaa.

2. Wakiil ayaa la magacaabi karaa Qodobka III Qaybta 2 e Qayb-hoosaadka D kasta.

Qayb-hoosaadka C. Ganacsi: Milkiile kasta oo Whittier ku leh ganacsi, mid macaashdoon ah iyo mid aan macaashdoon ahay, hal (1) cod kaliya ayuu leeyahay iyadoon loo eeggayn inta ganacsi, hanti ama shirkaddo uu Whittier ku leeyahay iyadoon loo eeggayn. Tallaabooyinka la qaado samaysashada xaq u yeelasho coddayn iyo caddaymaha xaq u yeelashada waxaa ka mid ah:

1. Milkiilaha ganacsiga leh waa inuu horey udiiwaangeliyaa shirkadda ama ururka isagoo soo hor istaagaya Whittier Alliance si uu usoo bandhiggo caddayn lahaanshada isoo soo bandhiggaya aqoonsi sawiri leh oo uu gobolka soo saaray iyo nuqdi caddayn shati ganacsi, nuqdi biilka korontada ama warqadda bangiga soo diro oo ay ku qoran yihiin magaca milkiilaha iyo magaca ganacsiga si uu ucaddaeeyo in ganacsi uu Whittierku yaalo. Haddii magaca milkiilaha hantida aanan ku qornayn dukumentiyadan markaa waxaa loo baahnaan doonaa nuqdi ka mid ah qodobadda wadashaqaynta ee wax kale oo caddaynaya la'haanshaha hantida oo waa in lala yimaadaa.

2. Wakiil ayaa la magacaabi karaa Qodobka III Qaybta 2 ee Qayb-hoosaadka D kasta

3. Samaysashada xaq u yeelashada coddaynta ayaa sidoo kale ah mid aad xaq ugu yeelanayso xubin ka ahaanshaha Ururka Ganacsatada ee Whittier Alliance

Qayb-hoosaadka D. Wakiilka loo Magacaabay: Milkiile hantida, milkiile ganacsi, macaash raadin ah iyo aan macaash-doonka ahayn, oo xaq u yeelahshada caddeeya iyadoo la raacayo Qodobka III, Qaybta 3, Qayb-hoosaadka B iyo C, wuxuu magacaabi karaa mid (1) iyo hal (1) kaliya oo wakiil ah iyadoon loo eegayn inta ganacsi ama nooca ganacsi, hanti ama shirkaddo uu Whittier ku leeyahay. Dukumentiga wakiilka waa in la caddeeyaa. Tallaabooyinka la qaado samaysashada xaq u yeelasho coddayn ee wakiilka la magacaabay (qofka aan milkiilaha) ahayn iyo caddaymaha xaq u yeelashada waxaa ka mid ah:

1.Wakiilka la magacaabay waa inuu Whittier Alliance yuu yimaadaa waa inuu tusaa shati darawalnimo ee gobolka soo saaray ama kaarka aqoonsiga ee gobolka soo saaro oo sawirka wakiilka ku dheggan.

2.Wakiilka la magacaabay waa inuu la yimaadaa warqadda shirkadda, oo uu milkiilaha ama agaasimaha shirkadda soo saxiixay, kaasoo awood usiinaya wakiilka ku magacaaban inuu noqodo wakiil coddayn kara isagoo ku hadlaya magaca ganacsiga ama ururka.

3.Si xaq loogu yeesho, wakiilku waa ahaadaa qof shirkadda ka shaqeeya oo uuna la yimaadaa caddayn ah inuu ushaqeeyo milkiilaha ganacsiga ama hantida.

4.U magacaabida wakiil milkiilaha hantida iyo milkiilaha ganacsiga macaash raadin ah, oo ay ku jiraan kuwa dhowr qof islaleh oo ku yaala xaafadda Whittier, xuquuqda coddaynta iska dhiga.

5.Caddaymaha xaq u yeelashada Guddiga Agaasimayaasha ayaa dib u eegi doonaa marka xigta ee ay guddiga qabanayaan kulanka caadiga ah.

Qaybta 4: **<u>Liiska Coddaynta Xubnaha Sare</u>** Liiska xubin ka ahaanshahaaga dadka Whittier Deggan, kaasoo horay u yeeshay xuquuq coddayn sida ku qeexan Qodobka III Qaybta 3, wuxuu ku sii jiri doonaa Whittier Alliance oo kulanka ayaa la keen doonaa. Xubnaha codeeyaha ee deggan oona ku jira liiska sare waxa kaliya uu ubaahan yahay inuu kulanka la yimaado aqoonsi sawirkooda ku dhegan. Hanti horey loogu daray liiska xubnaha ganacsato iyo hanti waxaa lagu xifdin doonaa oo la horkeeni doonaa shirarka Whittier Alliance ay qabtaan.

Qaybta 5: **<u>Xuquuqda Xubinka</u>** Xuquuqda coddaynta ee xubin kasta:

Qayb-hoosaadka A. Deggan: Mar haddii la isla garto xaq u yeelashada coddaynta, sida ku cad Qodobka III Qaybta 3 Qayb-hoosaadka, xuquuqda xubin ahaanshaha markiiba waa lagu dhaqaaqi karaa. Xubin ka ahanshaha waxaa ka mid ah xuquuqda coddaynta Kullamada Guddiga Matala Whittier Alliance, Kulanka Sannadlaha, Kulamada Gaarka ah ee xubin ka ahaanshaha, iyo

doorashada xubnaha guddiga oo Dhan. Dadka deggan wakiillada ganasatada ma u dooran karaan in ay noqdaan Guddiga Agaasimayaasha.

Qayb-hoosaadka B. Hanti: Mar haddii la ansaxiyo xaq u yeelashada coddaynta, sida ku cad Qodobka III Qaybta 3 Qayb-hoosaadka B iyo D, xuquuqda xubin ahaanshaha markiiba waa lagu dhaqaaqi karaa. Xubin ka ahanshaha waxaa ka mid ah xuquuqda coddaynta Kullamada Guddiga Matala Whittier Alliance, Kulanka Sannadlaha, Kulamada Gaarka ah ee xubin ahaanshaha, iyo doorashada xubnaha guddiga oo Dhan ee Kulanka Sannadlaha ah. Mikiilayaasha hantida leh ma u dooran karaan in ay noqdaan Guddiga Agaasimayaasha.

Qayb-hoosaadka C. Ganacsi: Mar haddii xaq u yeelashada coddaynta la ansaxiyo, sida ku qeexan Qodobka III Qaybta 3 Qayb-hoosaadyada C iyo D, iyo markii habsami usocodka howsha la dhameeyo markaa xuquuqda xubin ka ahaanshaha waa lagu dhaqmi karaa mar haddii la helo warqad ka socota Whittier Alliance oo xubin ka ahaanshaha caddaynaysa. Warqadda caddaynta waa in lala yimaadaa marka la qabanayo dhammaan kulamada marka lagu guddi jiro howsha guddiga Whittier Alliance la qabanayo.
Xubin ka ahanshaha waxaa ka mid ah xuquuqda coddaynta Kullamada Guddiga Matala Whittier Alliance, Kulanka Sannadlaha, Kulamada Gaarka ah ee xubin ahaanshaha, iyo doorashada xubnaha Guddiga Agaasimayaasha inta lagu guddi jiro kulanka Guddiga Ganacsatada.
Xubnaha ganasatada xubnaha guddiga ee Dhan ma dooran karaan.

Kulmada Whittier oo dhan marka la qabanayo dhammaan xubnaha oo dhan waxay xaq u leeyihiin "xuquuqda codka".

Qaybta 6: **<u>Wareejinta Xubin ka ahanshaha</u>** Ma jirto xubin xubin ka ahaanshahiisa qof kale ku wareejin kara
ama xuquuq kasta oo ka soo baxda halkaas oo aan ka ahayn tan ku qeexan Qodobka III, Qaybta 3. Qayb hoosaad D.

Qaybta 7: **<u>Lacagta Xubin ka ahanshaha</u>** Ma jiri doono lacagta xubin ka haanshaha oo loo baahannayo.

Qaybta 8: **<u>Joojinta Xubin ka ahaanshaha</u>** Xubin ka ahanshha wuxuu ku egyahay mar ala markii qofka uu noqdo qof aan Whittier degganayn, oo aan Whittier hanti ama ganacsi aan ku la'hayn.

QODOBKA V GUDDIGA AGAASIMAYAASHA

Qaybta 1. **<u>Awoodaha Guud iyo Waajibaadyada</u>** Ganacsiga iyo hantida Shirkadda waa inuu ahaadaa mid Guddiga Agaasimayaasha ay maarayso oo ay maamusho. Guddigu waa inuu qabtaa kulamo, howsha kala socodsiiyaa, maareeyaa arrimaha Shirkadda oo go'aamiyaa istiraatiijiyada qorshaynta iyo sharciyada Shirkadda

Waajibaadka agaasimaha waa waajib daryeel, daacad iyo fulinta waajibaadka. Waajib daryeelka wuxuu agaasimaha ugu baahan yahay in ay ku dhaqmaan xirfadda iyo daryeelka agaasimaha sida qofka caadiga wax u qaban la'haa marka ay ku guddi jiraan marxaladdaha taa la mid ah. Waajibaadka daacadnimada ayaa agaasimayaasha uga baahan in daacadnimada ay u qabaan shirkadda ay ka soo hormariyaan danaha iyo ururada kale. Agaasimayaasha waxaa in ay daah ka qaadaan wax kasta oo oo dhalin kara dano is diidan, cudur-daar nafsi ah ku yeesha dooda ama coddaynta marka la ogyahay ama ay dhici karto in ay jirto dano is diidan. Ka soo baxida waajibaadka waxay agaasimayaasha ay uga baahan tahay in ay la yimaadaan ficil waafaqsan qodobada shirkadda, Sharci-Hoosaadka iyo dukumentiyada awooda usiiya, iyo sidoo kale dhammaan sharciyada iyo xeerarka quseeya.

Waajibaadyada Guddiga Agaasimayaasha waa in ay ku jirtaa balse aysan ku koobnaan:

- **A.** Sharciyada ururka ilaaliya ee ku qoran sharciyada iyo hadafka guddiga.
- **B.** Shaqaalaysiinta, mushharka qorida iyo dib u eegista waxqabadka agaasimaha Meel-marinta.
- **C.** Kor-kala-socoshada dhaqaalaha shirkadda
- **D.** Ansaxinta miisaaniyadda sannadlaha ee shirkadda
- **E.** Soo bandhiggida danaha shirkadda dhammaan waajibaadyada iyo mas'uuliyaddaha sida looga baahan yahay in lagu taageero jiritaanka shirkadda sida loo arko in ay tahay danaha ugu muhiimsan ee sharkadda.

Guddiga waa inuu isticmaalaa dhammaan awoodaha noocan ah iyadoo ay ku xiran tahay Qodobada Shirkadda u yaala, Sharci-Hoosaadyadan iyo dhammaan sharciyada quseeya, iyo mas'uuliyadda ammaanada ee dhanka shirkadda iyo xubin ka ahaanshaheeda.

Qaybta 2. **<u>Shuruuddaha</u>** Agaasime kasta oo ka tirsan Guddiga Agaasimayaasha oo Dhan waa inuu:

A. ahaadaa xubin xaq u leh inuu coddeeyo ugu yaraanna lix bilood ka hor laga bilaabo taariikhda arjiga ama waqtiga loo magacaabay

B. awooda inuu muujiyo ka qaybgal hadda ah iyo ka qaybgal joogto ah oo uu Whittier Alliance ku la'haa

C. ahaadaa mid awood u la'haa oo soo xaadirayaha kulamada Whittier Alliance ay kafiilatay oo dhan ama ku jira kuwa howsha wada inta sannadka uu soday

D. ahaadaa qof taageerayo ulajeedka iyo hadafka shirkadda si ku xusan Qodobka II ee kasta

E. ahaadaa mid ku raasan inuu u hogaansamo Qodobadda Wadashaqaynta iyo Sharci-Hoosaadyada

F. ahaadaa qof aan galan ficil xaasidnimo ama sumcad-ridis lid ku ah Whittier Alliance ama xubin kasta oo Guddiga Agaasimayaasha ka tirsan ama haddii kale qashqashaad ku sameeyay hadafka iyo ulajeedka shirkadda.

Qaybta 3: **<u>Tirada iyo inta uu ka kooban yahay</u>** Guddiga Agaasimayaasha waa inuu ahaadaa mid ka kooban kuwa soo socda:

1. Shan iyo toban (15) agaasimayaal guud ahaan la doortay.

2. Kursiga Guddiga kasta oo Matalaya Guddi la aqoonsan yahay oo lagu doortay sida waafaqsan Qodobka VlII, Qaybta 3, Qayb-hoosaadka B ee Sharci-Hoosaadkan, waa inuu si atomaatik ah agaasime u noqdaa, haddii horayba aan loo dooran.

3. Afar (4) wakiil laga bilaabo Ururka Ganacsatada Whittier. Waa in aysan ka badnaan laba (2) ka socda qaybta macaash raadin ah iyo in aysan in ka badan laba (2) ka socda qaybta ushaqeyn in faa'ido helo.

4. Wakiillada waxaa lagu dooran doonaa marka la qabto kulanka ugu horreeyo ee Ururka Ganacsatada ay yeelanayaan isla markiiba marka uu dhaco Kulanka Sannadlaha